

Nidaam cusub oo lagula dagaalamayo cunsurinimada

Luulyo 18, 2022

Qorshe cusub oo lagu hirgalinayo tallaabo wax ku ool aah si wax looga qabto cunsurinimada ayaa gacan ka gaysan doona dhisidda gobol soo dhaweeya ayna u dhan yihiin dhammaan dadka reer Alberta.

Qorshaha Ka Hortagga Cunsurinimada Alberta wuxuu muujinayaa dadaalka dowladda Alberta ay ugu jirto si ay kaalin mihiim ah uga qaadata wax ka qabashada cunsurinimada. Qorshuhu wuxuu qeexayaa tallaabooyinka gacan ka gaysanaya barista dadka reer Alberta qiimaha ay leedahay kala duwanaanshaha bulshadu, ka saaridda caqabadaha nidaameed ee kajira helitaanka adeegyada iyo barnaamijyada dowladda, iyo xaqiijinta in dadka reer Alberta ay u sinaadaan helitaanka macluumaadka, ilaha, adeegyada iyo fursadaha.

“Saddexdii sanno ee la soo dhaafay, dowladda Alberta waxay hore udardargelisay dadaalo ay wax uga qabatay cunsurinimada, laakiin wali waxaa jira arrimo kale oo la hirgelin karo si loo soo afjaro dhammaan noocyada cunsurinimada, midab kala sooca iyo cunsurinimada nidaameed si kama danbays ah. Qorshe howleedkaanu wuxuu unoqon doonaa gobolkeena hage ay kula dagaalamayo tallaabooyina ku qaadayo si loo ciribtiro cunsurinimada loona xaqiijiyo in guud ahaan Alberta ay noqoto meel u furan, cadaalad iyo barwaaqona u ah qof walba.”

Kaycee Madu, Wasiirka Shaqaalaha iyo Socdaalka

Ayada oo qayb ka ah qorshaha, dowladda Alberta waxay qaadi doontaa tallaabooyin ay uga ilaalinayso kooxaha u nugul nacaybka iyo cunsurinimada, bulshadana ay awood u siinayso inay kor uqaado wadajirka bulshada, kala duwanaanshaha iyo dhaqamada badan loogana faa’iidaysto wadajirka bulshada.

Tallaabooyinkaanu waxay ku dhisanyihiin talooyinka laga helay Golaha Ka Tala Bixinta Kahortagga Cunsurinimada Alberta iyo jawaabaha laga helay dhammaan kooxaha Alberta ee la dagaalamaya cunsurinimada.

“Waxaan rabaa in aan uga mahadceliyo Golaha Ka Tala Bixinta Kahortagga Cunsurinimada Alberta iyo kooxaha bulshada ee ka tala bixiya dadaalkooda socda ee lagula dagaalamayo cunsurinimada. Dadyowga la haybsooco iyo kuwa Asalka ah, sida dhamaan dadyowga reer Alberta, waxay muhiim u yihiin barwaaqada gobolka yaga, ayada oo tallaabooyinka la adeegsanayana, waxaan si wadajir ah uga shaqayn karnaa in aan gacan ka gaysano in aan xoojino una dabaaldegnu guulahooda.”

Muhammad Yaseen, Kaaliyaha Wasaaradda Socdaalka iyo Kala duwanaanshaha Dhaqamada

Tallaabooyinka lagu qeexay qorshaha waxaa loo qaybiyay shan mowduuc, kuwaas oo iftiiminaya meelaha muhiimka ah ee dowladda Alberta ay qorshaynayso in ay hormar ka samayso si loo dhiso bulsho siman oo wadajirta. Mowduucyadaan waxaa kamid ah: waxbarista dadweynaha iyo baraarugga dhanka dhaqanka; dowladda oo fududaynaysa horumarinta nidaamyada; xoojinta bulshada; ka rogaal celinta dhacdooyinka nacaybka iyo fal danbiyeedka ah; iyo xogta iyo cabiridda.

Si loo xaqiijiyo in tallaabooyinka dowladdu yihiin kuwo waxtar leh, qorshaha waxaa kamid ah talaabooyin lagu qiimaynayo habsamisocodka qorshaha. Dowladda Alberta waxay sii wadi doontaa in ay talooyin ka hesho Golaha Ka Tala Bixinta Kahortagga Cunsurinimada si dhowna ula shaqayso bulshooyinka la haybsooco iyo kuwa Asalka ah sidii ay si wanaagsan ugu fahmaan caqabadaha nidaamka kajira iyo sida mustaqbalka wax looga qaban karo.

Macluumaad kooban

- Guddiga Ka Tala Bixinta Kahortagga Cunsurinimada ee Alberta waxaa loo aasaasay in uu talo ka siiyo dowladda Alberta daadaalada ay kula dagaalamayso cunsurinimada kuna samaynayso bulsho wadajirta oo is aqbasha guud ahaan Alberta.
- Dowladda Alberta waxay bilowday hirgelinta waxqabadyo cunsurinimada looga hortagayo, oo ay kamid yihiin:
 - aasaasidda xafiis qaabilsan danbiyada nacaybka ah iyo Waaxda Isku Duwidda Falal Danbiyeedka Nacaybka ah
 - si rasmi ah u aqoonsashada ku dhaqanka siyaasadda First Nations ee kamidka ah *Xeerka Booliska*
 - mamnuucidda tuuganimada credit kaarka
 - hirgelinta Barnaamijka Kaabeyaasha Ammaanka ee Alberta (Alberta Security Infrastructure Program)
 - meelmarinta *Xeerka Hab dhaqanka Diiwaangalinta Cadaaladda ah* iyo abuurista Xaafiiska U Cadaalad Samaynta Dadka Cusub si dadka reer Alberta looga caawiyo iyo heerarkooda awoodeed la aoonsado
 - diyaarinta siyaasad wada xiriir oo loo dhanyahay oo ay dowladdu leedahay

Macluumaadka la xiriira

- [Qorshe Howleedka Kahortagga Cunsurinimada ee Alberta \(Alberta's Anti-Racism Action Plan\)](#)
- [Golaha Ka Tala Bixinta Kahortagga Cunsurinimada Alberta \(Alberta Anti-Racism Advisory Council\)](#)